

## **SU'AALAHHA INTA BADAN LA ISKA WEYDIIYO Dib u dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg Janaayo 2018**

Waxaa mahada leh cod bixiyayaasha taageeray Maalgelinta daymeed ee Maajo 2017-ka, Dugsiga Dhexe ee Kellogg dib ayaa loo dhisay. Maalgelinta daymeed sidoo kale waxaa lagu bixinayaa dib u dhiska iyo casriyeynta 3 dugsi sare iyada oo la bixinayo \$150,000,000 oo ah lacag dhaqaale ah oo loogu talagalay mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada ee guud ahaan degmada.

### **Waa maxay sababta dib loogu dhisay Kellogg marka la barbardhigo dib u habayn lagu sameeyo?**

Iyada oo qayb ka mid ah gudbinteedii Maalgelinta daymeed ee Maajo 2017-ka, Guddiga Dugsiga waxay dooratay nooca bedelaada buuxda ee ah in dib u dhis la sameeyo sababta oo ah waxay ku kacaysaa kharash ka yar dib u cusboonaysiinta/wax ku darida waxayna degmada u ogolaanaysaa in ay dhisto xarun casri ah oo wax ka qabata dhammaan arrimaha la xiriira caafimaadka iyo badbaadada ee ka jira Kellogg iyada oo la buuxinayo dhammaan baahiyaha barnaamij ee dugsiga dhexe ee PPS. [Wixii macluumaad dheeraad ah akhri qoraalka Kala doorashada Bedelaada la barbardhigayo Dib u cusboonaysiinta/Wax ku darida ee PPS Kellogg.](#)

### **Ma jiri doonaan dadaalo lagu ilaalinayo qaybaha dhismaha hada jira ee dhismaha cusub?**

Dugsiga Dhexe ee Kellogg wuu ilaalin doonaa qaybo ka mid dhismaha hada jira isaga oo qaybahan raacin doona dhismaha cusub iyo goobta si loo ilaaliyo taariikha Kellogg. Mashruuca wuxuu hada soo jeedinayaa in la badbaadiyo noocyada kala duwan oo ka mid ah qaybaha dhismaha iyada oo qayb ka ah nidaamka duminta. Marka ay naqshadeyntu bilaabanto, qaybahaasi waxaa lagu dari doonaa mashruuca. Iyada oo qayb ka ah dadaalka badbaadinta, qaybaha gudaha sida alwaaxda sagxada dugsiga waa la ilaalin doonaa waxaana dib loogu isticmaali doonaa dhismaha cusub.

### **Waa maxay waqtiga loo qabtay dhismaha?**

Waqtiga hada loo qabtay dhismuhu waa laga bilaabo Gu'ga 2019-ka ilaa Dayrta 2020. Markii u tartanka loo galay shaqadu dhacay qandaraasle ayaa la doortay, kooxda mashruuca ayaa dib u eegi doonta jadwalka dhismaha ee faahfaahinta qandaraaslaha iyo qorshaha diyaarinta. Degmadu waxay siin doontaa deriska iyo bulshada jadwalka dhismaha, qorshaha iyo saameynta kale ee la filayo in xaafada ku yeesho marka ay diyaar u tahay in la fuliyo.

### **Waa maxay saameynta uu dhismuhu ku yeelanayo xaafada?**

Qorshaha diyaarinta ee qandaraaslaha ee Degmadu dib u eegtay waxaa ku jiri doona faahfaahin la xiriirta gelitaanka gaadiidka dhismaha ee goobta inta lagu jiro duminta iyo wejiyada kala duwan ee mashruuca. Iyada oo ay sabab u tahay xaddidaada goobta, waxaa dhici karta baahi

ah inta lagu jiro wejiga cusub ee dhismaha in lala shaqeeyo mulkiilayaasha leh hantida goobta u dhow si loo bixiyo meel dheeraad ah oo la dhigto baabuurka dhismaha haddii dhammaantood ay deeqi weydo goobtu; tani waxaa la go'aamin doonaa isla markaana la isku duwi doonaa dhismaha ka hor.

### **Miyuu jiri doonaa xiritaanka waddooyinka oo wakhti dheer ah?**

Waxyaalaha looga baahan yahay suurtagalnimada xiritaanka waddooyinka weli lama go'aamin, laakiin waxay u badan tahay in ay tahay mid yar. Waxaa jiri kara in qayb ahaan la xiro waddooyinka SE 69<sup>th</sup> waqtiyo la doortay inta lagu jiro dhismaha. Deriska waxaa la ogeysiin doonaa ka hor xiritaanad.

### **Waa maxay nidaamka gaarka ah ee xakamaynta kiimikada lead/asbestos inta lagu jiro duminta?**

PPS waxay qandaraas la gashay qof ku takhasusay yaraynta maaddooyinka halista ah kaasi oo si gaar ah u tilmaami doona sida xakamaynta kiimikada lead/asbestos ay u dhici doonto inta lagu jiro duminta si loogu hoggaamsano nidaamyada u yaala badbaadada ee Degmada, degaanka, gobolka iyo federaalka.

### **Maxaa ku dhici doona goobta cagaaran iyo meelaha lagu ciyaaro miyay sii ahaan kuwo ay geli karto**

#### **xaafadu inta lagu jiro saacadaha aanu dugsigu jirin?**

Barnaamijka iyo qorshaha goobta ee hada waxaa ka mid ah meelo bannaan oo lagu ciyaaro oo waxyaabo badan loo isticmaali karo, oo shaqaynaya iyo dhisme daboolan oo loogu talagalay in saacadaha aanu dugsigu jirin ay dadka degan xaafadu isticmaalaan, iyaga oo u isticmaalaya si aan rasmi ahayn iyo iyada oo la raacayo nidaamka Istimaalka Bulshada ee Dhismayaasha.

### **Barkadda dabaashu ma qayb ayay ka ahaan doonta naqshada?**

Ma jiraan qorshayaal ah in lagu daro barkadda dabaasha oo qayb ka ah mashruucani.

### **Maxaa la samayn doonaa si loo wanaajiyo meelaha lagu socon karo iyada oo la adeegsanayo dhulka dugsiga si hab fiican loogu xiro xaafadaha?**

Barnaamijka iyo qorshaha goobta ee hada wuxuu wanaajin doonaa meelaha lagu socon karo iyada oo la adeegsanayo dhulka dugsiga oo leh meelo dadku ku lugeeyaan oo ku yaala guud ahaan dhismaha iyo meel la geli karo leh meelaha la dhigto baaskiilka/bushkuleetiga oo loogu talagalay dadka degan xaafada inta lagu jiro saacadaha aanu dugsigu jirin?

### **Maxaa ku dhici doona geedaha qaangaarka ah ee hada jira ee ku yaala goobta Kellogg?**

Geedaha ku yaala waddooyinka waa la ilaalin doonaa ilaa inta ugu badan ee suurtoogalka ah.  
Geedaha hada jira, gaar ahaan geedka weyn ee loo yaqaan oak, weli waa la qiimeynayaa si loo  
go'aamiyo in la ilaalin karo isaga oo qayb ka ah naqshada guud ee goobta.